



Kooxaha qeybaha Kala duwan ee Family Care (Daryeelka Qoyska)

Kumaa ku jira kooxdaada qeybaha kala duwan?

Marka aad ka qeyb gasho barnaamijka Family Care, kooxda dad ah ayaa kaala shaqeyya inaad aqoonsato nooca caawimada aad u baahan karto si aad u buuxiso baahiyahaaga oo kaala shaqeyya inaad habbayso adeegyadaada daryeelka mudada dheer. Waxaad tahay qeyb firfircoon oo kooxda ah kaas oo sidoo ku dara, inta ugu yar, maareeyaha daryeelka iyo kalkaalisada diiwaanka gashan. Waxaad dooran kartaa inaad ku darto xubinta qoyskaaga ah ama qofka aad jeceshahay ee kooxdaada. Waqtiga qaarkood dadku waxay doortaan xirfad yaqaano kale si ay uga qeyb galaan sidii xubnaha kooxda. Kooxda waxaa loogu yeedhaa "kooxda qeybaha kala duwan."

Maxay qabataa kooxda qeybaha kala duwani?

Kooxdu waxay dhammaystirtaa qiimaynta baahiyahaaga oo horumarisaa qorsahaha adeegyada si loo buuxiyo baahiyahan. Adeegyada lagu muujiyay qorshahaaga adigaa lagu gaar yeelay oo waxay xooga saaraan kuwa ugu saamaynta badan iyo qaabka waxtar leh xaga qiimaha si ay u buuxiso baahiyahaaga. Maareeyaha kiiska iyo kalkaalisada diiwaanka gashay waxay oggolaadaan lacag bixinta adeegyad alagu oggolaaday, oo waxya ka wa rhayaan tayada adeegyada aad hesho.

Tani waa tusaalaha kooxda qeybaha kala duwan ee ku jirta Family Care. Qofka jooga xaruntu waa ADIGA. Dadka ku qoran bogosyada hadhka khafiifka ah leh waa dadka aad ADIGU dooratay si ay uga qeyb galaan kooxdaada:

